**Macluumaad muhiim ah oo ku socda dhammaan qoysaska ku nool degmada Linköping**

# Haddii musiibo qaran ama dagaal yimaado




*Buug-yaraha waxaa la daabacay deyrta 2024.*

**Degmada Linköping**
linkoping.se/krisberedskap

Tekniska verken

Linköping

# Waa lagu salaamay!

**Buug-yarahaan waxaa loo qaybinayaa dhammaan qoysaska ku nool degmada Linköping, si uu u noqdo kaabe maxalli ah oo kaabaya buug-yaraha MSB-ta ee "Haddii musiibada ama dagaalku yimaado".**

Hay'adda ilaalinta bulshada iyo u diyaargarowga, MSB, waxay ka shaqeysaa ka xoojinta bulshada ee dhanka ka hortagga iyo maareynta shilalka, musiibooyinka iyo xaaladaha dagaalka. Haddii aadan haysan buug-yarahooda, waxaad mid ka dalban kartaa msb.se.

Buug-yarahan maxaliga ah, waxaan rabnaa inaan kugu siinno talo iyo tusaaleyn ku saabsan sida, adigaaga deggan degmada Linköping, aad ugu diyaargaroobi karto inaad si fiican u maareyso xaalad adag oo bulsho ama haddii ay xumaato, dagaal. Waxa aad samayso musiibada ka hor, ayaa nolosha ka dhigaya mid adag inta lagu jiro xaaladda adag.

**Waxaad qayb ka tahay diyaargarowga degmada Linköping!**

Keydso buug-yaraha si aad si fudud ugu hesho isaga, waxa ku jirana kala hadal dadka kale ee agagaarkaaga ah.




**Noqo halyay maalin walba ah! Diyaar u ahaw musiibo qaran!**

# Ilaa inteebaad diyaarsantahay ***adigu*** haddii ay lacalla wax dhici lahaayeen?

**Linköping waa magaalo casri ah oo inteenna badan aan raaxada u haysanno mid la isku hubo. Bal qiyaas in ay korontadu tagto, aysan wax biyo ah tubbada ka imaaneyn, qabowna guriga ku billawdo. Cuntadu wey ku xumaaneysaa tallaajadda iyo qaboojiyaha, kaar bangina wax loogama iibsan karayo dukaanka raashinka, haddii uuba furanyahay. Khad shaqaynaya ma jiryo markii aad isku daydo inaad wactanto, internetna dhawr maalinba ma shaqeyneyn.**

**In hal usbuuc koronto, biyo ama cunto la'aan la is bixiyo ma fududa. Laakiin badideennu waan is bixin karnaa haddii aan isu diyaarinnay.**

U-diyaargarowga musiibooyinka ee Iswidhishku wuxuu ku salaysanyahay inaan si wada jir ah isaga xil saarno ammaanka dalkeenna, nafteenna iyo qaraabadeenna. Mas'uuliyaddaada qofeed waxay ka dhigantahay inaad u diyaargarowdo inaad is bixiso ugu yaraan toddobo maalin ama in ka badan. Waxay qaadan kartaa waqti inta ay bulshadu sidii caadiga ahayd u shaqeyneyso mar kale. Qaad mas'uuliyadda naftaada iyo xigtadaada!

Caawimadda ay degmadu fidinayso waxaa ay siinaysaa dadka ay ku adagtahay in ay is bixiyaan, tusaale ahaan bukaannada iyo waayeellada. Sidaas darteed ayuu dadaalkaagu muhiim yahay!



# Sanduuq u diyaarso musiibo qaran

**Ha baqin – diyaar ahaw**

Maantaba billaw!

**Dadka badankoodu guriga way ku dhisan karaan maqaasiin diyaargarow oo nolol maalmeed. Ilaa imisa cunto ayuu qoyskaagu caadi ahaan u baahan yahay hal toddobaad?**

Had iyo jeer cunto ha kuugu jirto tallaajadda, qaboojiyaha iyo maqaasiinka si ay kuugu filnaato ugu yaraan hal toddobaad. Wax kasta oo aad ugu baahantahay musiibada qaran uma baahna inay ku jiraan sanduuqa xaaladaha adag. Seddex-meelood oo afar meel biyo ka buuxi dhallooyinka PET ee geli qaboojiyaha, ka qaboojiye ahaan ama si loo cabo. Fursad ma u haysataa inaad wax dubato haddii ay korontadu go'do? Hubi inaad guriga ku haysato dhuxusha wax lagu dubto ama wax u dhigma.

## Way fiicantahay in la haysto sanduuqa musiibada qaran

- [ ] Wax qasacadeysan iyo cunto waqti dheer gaari karta
- [ ] Jeerikaannada biyaha, dhallooyinka PET
- [ ] Dawooyinkaaga oo hal bil kugu filan
- [ ] Toosh, nalka foolka
- [ ] Shumaca kuleylka, shumac
- [ ] Raadiyo
- [ ] Beteriyo
- [ ] Bangi Koronto
- [ ] Lacag kaash ah
- [ ] Jikada duufaanka, taraqyo, dab-shid
- [ ] Boorsada gargaarka koowaad
- [ ] Warqadaha musqusha, masaxado qoyan
- [ ] Baco adadag (haddii musqusha aan biyo lagu furi karin)
- [ ] Buug-yaraha *Haddii musiibo qaran ama dagaal uu yimaado*
- [ ] Warqado, qalmaan




## Cunto fiican oo ay tahay in ay guriga kuu taallo

- Baradho, kaabash, karooto, ukun
- Rooti waqti dheer gaari kara
- Uusto jilcan ama rooti-saar ku jira caag la dhiijiyo.
- Saliid cunto, uusto adag
- Baasto degdeg ah, bariis, qamadi, budada bataatiga shiidan
- Khudaar cagaaran oo qasacadaysan
- Yaanyo shiidan oo baastada lagu kariyo
- Hilib, mallay, maraq qasacadeysan
- Maraqa nypon-ka, casiir ama cabitaan kale oo lagu hayn karo heerkulka qolka
- Qaxwo, shaah, shokolaato, baararka tamarta, loos

Waxaa fiican in la doorto cuntooyinka degdeg loo karin karo, aan u baahnayn biyo badan, la cuni karo iyadoon la karin, laguna kaydin karo heerkulka qolka.

**Xog dheeri ah oo ku saabsan maqaasiinka cuntada ee xilliga ay jiraan musiibooyin qaran:**

livsmedelsverket.se/matförråd

# Cunto iyo diirrimaad inta lagu jiro musiibada qaran

**Dadka duruufahooda iyo baahiyahoodu way kala duwanyihiin iyadoo hadba ku xiran inaad deggantahay baadiye ama magaalo fillo ama guri dabaq ah. Waa kuwan qaar ka mid ah talooyin guud oo ku aaddan maareynta waxyaabaha lagama maarmaanka ah marka nolol maalmeedka aysan u shaqeyneyn sidii caadiga ahayd.**

## Kuleylka hayso

Kuleylku si degdeg ah ayuu gurigaaga uga baabi'i karaa haddii uu bannaanku qabow yahay. Dooro qol aad isku daydo inaad heerkulka ku haysato.

→ Si fiican u xir-xir daaqadaha iyo albaabada. Bustayaal hor sur daaqadaha si ay uga ilaaliyaan jiijididda, kulaylkana uga celiyaan inuu daaqadda ka baxo. Bustayaasha ka hor qaad maalintii, si ay qorraxdu gacan uga geysato kor u qaadidda heerkulka gudaha.

→ Waqtiyo gaagaaban mar-mar hawada u fur si ay hawo fareesh ah usoo gasho, laakiin adigoo aan kulayl badan ka sii deyn.

→ Haddii aad dhowr guriga ku tihiin, isku qol ku seexda.

→ Si aad habeenkii u heshaan diirimaadka dheeri ah - teendho gudaha ku sameysta, isticmaalana bacda hurdada ee la dhexgalo.

→ Roogagga dhulka yaal waa dahaar dheeri ah.

→ Isku kululey dhar badan oo aad iska dul gashato.

## Cunto karso

Shoolad, tallaajad ama qaboojiye shaqeynaya la'aan, waxaa fiican inaad hor cunto cuntada guriga kuu taal ee khatarta ugu jirta in ay horta xumaato.

Ma haysaa dhallooyinka PET oo baraf leh? Ugu isticmaal qaboojiyaha sida qaboojiyayaal haddii loo baahdo. Laakin qaboojiyaha fur oo keliya haddii ay xaalad adagi jirto, maalmaha ugu horreeya. Haddii uu bannaanku qabowyahay, baakado si fiican loo xiray ayaad cuntada kula kaydin kartaa dibadda.

Cuntada dibadda kula karso meel wax lagu dubo ama dab shid yar dhiso, laakiin ka fikir khatarta dabka!



**U samey sanduuqa musiibooyin qaran xitaa xayawaankaaga guri joogtada ah!**
svenskablastjarnan.se/klara-krisen

# Qodobbada badbaadada

**Haddii ay jirto musiibo qaran, sida biyaha, korontada ama kuleylka oo go'a, waxay degmada Linköping furi kartaa goobo badbaado, meel ay dadku isugu yimaa-daan oo lala xiriiri karo haddii uu jiro qalqal bulsho.**

Goobaha badbaadada ayaa la isku kululayn karaa, laga heli karaa macluumaad ku saabsan xaaladda, laga soo qaadan biyo, lagana cabbeysan karaa taleefannada gacanta.

Meesha ugu fiican, uguna ammaan badan dadka caafimaadka qaba waa qofka gurigiisa inta badan, xitaa haddii, marka ay xaaladdu qasantahay, ay arrintu ka dhib badnaaneyso sidii hore loogu bartay.

Ku dhawaad 30 dugsi oo ay degmadu leedahay ayaa Linköping u shaqayn doona sidii goobo badbaado. Xitaa dhismooyin kale way noqon karaan sidaas. Heerka adeegga ee goobaha badbaadadu waa kala duwanyahay iyadoo ku xiran qaabka maqsinka, waxa dhacay iyo inta qasnaanta bulshadu ay sii soconeyso. Xaaladaha qaar, waxaa jiri karta fursan cunto lagula karsan karo, lagula mayran karo, lagulana hoyan karo. Haddii ay degmadu u baahato in ay furto mid ka mid ah goobaha badbaadada, waxaan sheegeynaa boggayaga linkoping. se iyo Raadiyaha Iswiidhan P4 Östergötland 99.8 MHz iyo wilibo raadiyaha maxalliga ah ee Linköping 95.5 MHz.

**Haddii ay jirto musiibo qaran waxaad sidoo kale booqan kartaa Kontakt Linköping si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:**

- Maktabadda weyn, Östgötagata 5
- Faras magaalaha Skäggetorp
- Qalcadda Berga, Herrgårdsgatan 3a

**Ama maktabadda degmada:**

- Faras magaalaha Ekholmen
- Faras magaalaha Johannelund
- Faras magaalaha Lambohov
- Himnaskolan, Linghem
- Dabaqa dhexe 1, Ljungsbro
- Faras magaalaha Kärna, Malmslätt
- Faras magaalaha Ryd
- Näckrosvägen 4a, Sturefors
- Agora, Faras magaalaha Skäggetorp 18


Koodka QR-ka iskaan-garee si aad u aragto liiska iminka ah ee goobaha badbaadada.

Ama booqo: linkoping.se /trygghetspunkter

## Xil isi saar, isna caawiya marka ay jirto musiibo qaran

Haddii aan wadajir u qaadno mas'uuliyadda nafteenna iyo xigtadeenna inta lagu jiro musiibada qaran, waxaa taageerada bulshada lagu jihayn karaa kuwa dhab ahaantii u baahan.

Baro deriskaaga si aad u caawiso ama caawimaad uga hesho haddii loo baahdo.



# Hoy badbaado iyo alaarmi dibadda ah

**Haddii ay xaaladdu adagtahay, waxaad u baahan kartaa inaad tagto hoy badbaado. Kama tirsanid hog badbaado oo gaar ah ee waxaa isticmaaleysaa midka kuugu dhow.**

Hoyga badbaadadu wuxuu hor iyo horraan fursad u yahay aagagga ay adagtahay in daadgureeyo, tusaale ahaan xaafadaha Linköping ee aadka loo degganyahay. Haddii uu qofku degganyahay baadiyaha, laga yaabee inuu haysato maqsin dhulka hoostiisa ah ama wax la mid ah oo noqon kara hoy badbaado.

Haddii aad maqasho allaarmi diyaarad, isla markiiba tag hoy badbaado ama meel kale oo badbaado leh, sida maqsin dhulka hoostiisa ah ama tunnel. Allaarmi diyaarad waa calaamad loo isticmaalo in loogu digo dadweynaha haddii ciidamada melleterigu ay ogaadaan weerar cirka ah oo soo socda.




Isku day inaad ogaato hoyga badbaadada ee ku yaal meesha ugu dhaw halka aad deggantahay iyo halka aad maalintii joogto.
msb.se/sv/verkting--tjanster/skyddsrumkarta/


**Waxa ay fiicantahay in loo qaato hoyga badbaadada:**

- Biyo ku jira dhallo ama caag
- Cunto u adkeysan karta heer kulka qolka
- Waxyaabo nadaafad
- Warqadaha musqusha
- Dawooyin
- Qalabka gargaarka degdegga ah
- Dhar diirran
- Taleefanka gacanta + cabbeeye ama bangiga korontada
- Dkumiintiyo: sida kaar aqoonsi, Laysin lacag caddaan ah, kaarka bangiga

## Sideebuu u yeeraa allaarmiga diyaaraddu?

**Alaarmiga diyaaradda**
Seenyaalo leh shook gaaban muddo 1 daqiiqo ah.

**Khatartu way dhamaatay**
seenyaale joogto ah 30 ilbiriqsi.



# Biyaha, bullaacadaha iyo qashinka

**Biyo la'aani aad bay uga khatarsantahay cunto la'aan**

**Hey'adda farsamada ayaa mas'uul ka ah biyaha, bullaacadaha, kululaynta, ururinta qashinka iyo inta badan shabakadda korontada ee Linköping. Musiibooyinka qaran waxay noo saameyn karaan siyaabo kala duwan, sidaa darteed waa muhiim in la raaco macluumaadka ay Hay'adda Farsamada iyo degmadu ku bixiyaan bogaggooda Internet-ka ,, xaashida macluumaadka ee qolalka qashinka iyo meelaha kale. Markaa waxaad garanaysaa sida aad ula dhaqmeyso xaaladda adag ee markaas taagan.**

Haddii ay si wayn korontadu u go'do, bambeeyayaasha biyuhu ma shaqeynayaan, wax biyo ahna tubbada kama imaanayaan. Is diyaari adigoo biyo ku sii shubanaya jeerikaanno iyo dhallooyinka, dhiganayana meel qabow iyo mugdi ah. U xisaabi ugu yaraan seddax liitar oo biyo ah qofkiiba habeen iyo maalintiiba.

Goobaha badbaadada ee degmada, waxaa laga yaabaa inay yaallaan biyo in xaddidan laga soo qaadan karo, laakiin soo qaado weelashaada. Macluumaad ku saabsan halka ay taangiyada biyuhu yaalliin waxaa lagu soo sheegayaa Raadiyaha Iswiidhan ee P4 Östergötland, raadiyaha maxalliga ah ee Linköping, iyo sidoo kale linkoping.se iyo kannaallada kale ee warbaahinta ee degmada.

Adigaaga leh biyo adiga kuu gaar ah iyo bullaacado waxaad u baahantahay inaad ka fikirto waxa aad u baahantahay inaad diyaarsato si aad uga gudubto koronto la'aan waqti dheer ah.

## Nadaafadda

Waxaad nadaafaddaada ku maareyn kartaa masaxe qoyan. Haddii aadan haysan biyo aad wax ku dhaqdo, qaaddooyinka iyo alaabta jikada ku tirtir waraaqaha istiraashada ama mara yar oo jeex ah.

## Qashin

Qashinka guriga waxaa lagu tuurayaa haamaha qashinka ee caadiga ah ilaa aad ka hesho xog kale. Qashinka si fiican u xirxir, kana ilaali cayayaanka.

## Musqul iyo bullaacado

Haddii aysan biyo ka imaaneyn tubbada waxaa dhici karta in ay bullaacaddu sidoo kale halleysantahay. Iska ilaali markaa inaad sidii caadiga ahayd u isticmaasho musqusha. Sidoo kale sooma qaadaysid biyo kale si aad u biyo-raaciso.

Mid ka mid ah talooyinka la bixinayo waa inaad bac adag saarato kursiga musqusha si aad ugu xaarto. Dabadeedna qashinka ku rid foosto musqul ama baaldi dabool leh. Markaas ka dib raac tilmaamaha Hey'adda farsamada ee ku aaddan sida qashinka loo maareeyo.

Tekniska verken



# Isgaarsiin iyo macluumaad

**La soco macluumaadka degmada Linköping iyo hey'adaha dowladda marka ay jirto musiibo qaran. Waxay taasi adiga iyo dadka kalaba idinka caawin kartaa inaad xaaladda si wanaagsan u maareysaan.**

## Kannaallo muhiim ah haddii ay musiibo qaran ka jirto Linköping

→ linkoping.se

→ facebook.com/linkopingskommun

→ tekniskaverken.se

→ kristinformation.se

**Raadiyo**
Sidoo kale waxaad dhageysan kartaa Raadiyaha Iswiidhan P4 Östergötland, 99.8 MHz. Xil gaar ah ayaa ka saaran in ay xog gudbiyaan haddii ay dhacdo musiibo qaran oo bulsho. Sidoo kale dhegayso raadiyaha maxalliga ah ee Linköping, 95.5 MHz, halkaas oo ay degmadu uga war bixin doonto xaaladda markaas taagan.

**Goobaha badbaadada** Degmada Linköping waxay meelo kala duwan samayn kartaa goobo badbaado. Waxaa jirta xog muhiim ah oo ku saabsan musiibada qaran iyo waxa ay tahay in ay sameeyaan dadka meesha deggan. *Wax dheeri ah ka akhriso bogga 6.*

FRG
FRIVILLIGA RESURSGRUPPEN

Kooxda iskeed isu xilqaantay (FRG), waxay tusaale ahaan maamushaa goobaha badbaadada iyagoo taas wakiil uga ah degmada Linköping.

Ma rabtaa inaad noqoto geesiga maalinta oo ma isu xilqaameysaa FRG?

**Iskaan-garey koodka QR-ka ama booqo:**
linkoping.se/
sakerhetsarbete

## Ka digtoonow warxumatashiilka – ilawareedyadana ka dood

Marka ay jirto musiibo qaran, qaar ayaa sku dayi doona inay kugu saameeyaan warxumatashiilid. Waxay taasi ku saabsantahay macluumaad been abuur ah ama qalloocan oo looga golleeyahay in lagu saameeyo aragtidaada ku aaddan waaqica jira, laguna daciifiyo kalsoonida aad ku qabto bulshada.

Ilwareedyada dood geli, xogta adan hubin in ay ka timid ilawareedyo lagu kalsoonaanyahayna la wadaag dad kale.



Waad ku karsoonaan kartaa macluumaadka degmada Linköping iyo hey'adaha dowladda.

# U diyaarsanaanta musiibada qaran ee loogu tala galay adigaaga oo naafada ah

**Ka fikir sida ay naafanimadaadu kuu saameyn karto haddii ay korontadu go'do ama ay dhacaan dhacdooyin kale oo lama filaan ah. Kuwani waa qaar ka mid ah siyaabaha fudud ee loo diyaargaroobo si aad u dareento ammaan iyo kalsooni haddii ay wax lama filaan ahi dhacaan.**

**Doorka kaaliyayaasha**Haddii maalmeedkaaga lagu caawiyo, hubi in ay shaqaalahaasi fahmaan sida khalkhalka bulshadu uu u saamayn karo noloshaada.

**U sheeg waxyaabaha ku saabsan xaaladaha degdegga ah**U oggolaw in ay dadka kale ogaadaan halka ay ku jiraan alaabaha xaaladaha degdegga ah.

**Qalabka caafimaadka**Hubi in qalabkaaga caafimaadku uu shaqaynayo xitaa haddii ay korontadu go'do haddii ay taasi suurtagal tahay.

**Aqoonsiga caafimaadka** Looxad, jijin ama kaar ahaan u sido aqoonsigaaga caafimaadka had iyo jeerba.

**Qorshayso daad-gureyn**Ka fikir sida aad uga bixi karto gurigaaga haddii loo baahdo. Baar meelaha laga baxo, cidna weydii haddii aadan wax hubin. Haddii ay dadka kale wax ka og yihiin naafanimadaada, waxay si fudud kuu caawin karaan haddii ay daadgureyni jirto.

**Eyga Hagaha ah**Haddii aad leedahay ey hage ah, qorshee sida aad u daryeeleyso inta ay socoto musiibada qaran.



# Qoraallo Muhiim ah!

**Immisa nambar oo taleefan ayaad korka ka haysaa haddii uusan mobiilkaagu shaqayn? Halkan waxaad ku qori kartaa nambarrada taleefannada ee xigtadaada iyo dadka kale ee muhiimka ah, halka aad kula kulmeysaan haddii aysan soconeyn inaad khad iskula xiriirtaan, hoyga badbaadada ee kuugu dhaw iyo xogta kale ee muhiimka ah.**

## → linkoping.se/krisberedspad

### 112

Nambarka xaaladaha degdegga ah ee Iswiidhan waa in la isticmaalaa marka ay jiraan xaalado degdeg ah oo ay khatar ku jirto naf, hanti ama deegaan. Wac 112 marka aad u baahantahay ambalaas, adeegga samatabbixinta ama boolis.

### 114 14

Nambarka booliska ee arrimaha aan degdegga ahayn.

### SMS112

Adigaaga dhegaha la' ama ka dhaawaca xagga hadalka ama maqalka, waxaa jirta fursad aad kula xiriiri karto nambarka xaaladaha degdegga ah 112 adoo adeegsanaya adeegga SMS112, qoraal taleefan oo analoog ah ama adeegyada gudbinta ee PTS. Wax dheeri ah ka akhriso **sosalarm.se**

### 113 13

Nambarka macluumaadka qaranka ee Iswiidhan. Wac 113 13 si aad u bixiso, una hesho macluumaad ku saabsan shilalka waaweyn iyo musiibooyinka.

### 013 - 20 60 00

**La xiriir Linköping** – jidkaaga xiriirka ee degmada Linköping. Waxaad sidoo kale geli kartaa: **linkoping.se/kontakt**

### tekniskaverken.se

Booqo **tekniskaverken.se/driftinformation** Halkaas waxaad ka arki kartaa xaaladda biyaha, korontada, kuleyliyaha fog iyo intarnetka.

### Raadiyaha

**Raadiyaha Iswiidhan P4 Östergötland** - 99.8 MHz **Raadiyaha maxalliga ah ee Linköping** - 95.5 MHz

### Xagga luqadaha kale: linkoping.se/beredapsbroschyr

Buug-yarahan wuxuu jiraa isagoo ku qoran Iswiidhish sahlan, sidoo kalana waxaa lagu turjumay Carabi, Dari, Ingiriis, Faarisi, Soomaali iyo Tigrinya. Waxay ku jiraan linkoping.se, waxaana lacag la'aan looga soo qaadan karaa meelaha booqashada ee Kontakt Linköping (eeg bogga 6).

The brochure is translated into English. You can find it on: linkoping.se/beredskapsbroschyr and it is also available for free at the visitor areas of Kontakt Linköping.

Buug-yaraha waxaa lagu turjumay af-soomaali. Waxaad ka heli kartaa linkoping.se/beredskapsbroschyr sidoo kale waxaad si bilaash ah uga soo qaadan kartaa meelaha booqdayaasha ee Kontakt Linköping.

እዚ ብሮሹር ብትግርኛ ተተርጕሙ ኣሎ። ኣብ linköping.se/beredskapsbroschyr ኣቲኻ ክትረኽቦ ትኽእል ኢኻ። ኣብ'ቲ Kontakt Linköping ዝብል ናይ በጻሕቲ ቦታ እዉን ገንዘብ ከይከፈልካ ብነጻ ኣለካ።

تمت ترجمة الكتيب إلى اللغة الإنجليزية. ويمكنك العثور عليه على موقع linkoping.se/beredskapsbroschyr في مناطق الزوار في Kontakt Linköping وهو متاح أيضًا مجانًا

بروشورها به انگلیسی ترجمه شده آست. شما میتونید در linkoping.se/beredskapsbroschyr جستجو کنید. و همچنین به صورت رایگان در Kontakt Linköping در دسترس هست

kontakt@linkoping.se
013 - 20 60 00

Tekniska verken

Linköping